

JAMHUURIYADDA		SOMALILAND
FAAFINTA RASMIGA AH		
SOMALILAND REPUBLIC OFFICIAL GAZETTE		النشرة الرسمية لجمهورية صوماليلاند
XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA JSL, HARGEYSA <i>E-mail: Faafintagaryaqaanka@gmail.com</i>		
Sanadka: 6aad	Cadadka: 5aad ee May	Taariikh: 03/06/2017
QIIMAHA CADADKA: SL. Sh.		
RUKUNKA (Subscription):		
<i>QIIMAHA FAAFINTA AAN DAWLIGA AHAYN ee Qaybta Shanaad: Sadarkii Boggii kastaaba SL. Sh.</i>		

TUSMADA CADADKA

<u>QAYBTA KOWAAD:</u> XEERARKA BAARLAMAANKA, HESHIISYADA CAALAMIGA AH IYO MIISAANIYADDA QARANKA:	
1) SOOMA BIXIN	
<u>QAYBTA LABAAD:</u> XEER MADAXWEYNE:	
1) <u>XEER MADAXWEYNE</u> Lr: 0783/052017 Magacaabid	268
2) <u>Xil-ka Qaadis</u> ; 07/05/17	269
3) <u>Magacaabid Guddida</u> 18-ka May	270
4) <u>XEER MADAXWEYNE</u> Lr: 0784/052017 Cafis Madaxweyne	273
5) <u>XEER MADAXWEYNE</u> Lr: 0785/052017 Magacaabid	274
6) <u>XEER MADAXWEYNE</u> Lr: 0786/052017 Cafis Madaxweyne	275
7) <u>XEER MADAXWEYNE</u> Lr: 0787/052017 Magacaabid	276

- 8) **XEER MADAXWEYNE** Lr: 0788/052017
Cafis Madaxweyne

277

QAYBTA SADEXAAD: XEER NIDAAMIYAYAASHA
WASAARADAHA, XEERARKA GOLAYAASHA
DEEGAANKA, NATIJOOYINKA DOORASHOOYINKA &
BARNAAMIJYADA DAWLADA:

- 9) **Wasaarada Cadaaladda JSL**
Fulin Go'aan kasoo Baxay Gudiga Cadaaladda
JSL

280


QAYBTA AFRAAD: GO'AANADA MAAMUL &
QARAARADA:

- 10) **SOOMA BIXIN**

QAYBTA SHANAAD: AMARADA, OGEYSIISYADA &
QANDARAASYADA DOWLADA:

- 11) Diiwaan Gelin Shirikada Salsabil General
Trading Company
Xafiiska Xeer illaalinta Guud 283
- 12) Diiwaan Gelin Shirikada Golis Printing
Stationery LTD,
Xafiiska Xeer illaalinta Guud 284
- 13) Diiwaan Gelin Shirikada SAMA-Wade General
Trading
Xafiiska Xeer illaalinta Guud 285
- 14) Diiwaan Gelin Hyper Cloud Technology Service
Xafiiska Xeer illaalinta Guud 287
- 15) Diiwaan Gelin Shirikada Al-Gebra Engineering
Company LTD,
Xafiiska Xeer illaalinta Guud 288
- 16) Diiwaan Gelin Shirikada Al Fadxi Logistics
Services LTD,
Xafiiska Xeer illaalinta Guud 289
- 17) Diiwaan Gelin Shirikada Berbera Real Estate
Company,
Xafiiska Xeer illaalinta Guud 291
- 18) Diiwaan Gelin Shirikada Quick Chain
International Trading & Logistic Company,
Xafiiska Xeer illaalinta Guud 292

19) Diiwaan Gelin Shirikada EGG House Poultry Farm, <u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u>	294
20) Diiwaan Gelin Shirikada Management International Consultancy <u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u>	295
21) Diiwaan Gelin Shirikada Rayxaan Company LTD <u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u>	296
22) Diiwaan Gelin Shirikada AK TURK Export & International Trade Company <u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u>	298
23) Diiwaan Gelin Shirikada Horyaal Alhuda General Trading <u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u>	299
24) Diiwaan Gelin Shirikada C&Y Sugar Cane Juice Company LTD <u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u>	300
25) Diiwaan Gelin Shirikada Hargeisa Suits House <u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u>	302
26) Diiwaan Gelin Shirikada Emdad Solutions and Service <u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u>	303
27) Diiwaan Gelin Shirikada Tacabmaal Lashing Company <u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u>	304
28) Diiwaan Gelin Shirikada Abdallah Ben Sayid Poultry Farm <u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u>	306
29) Diiwaan Gelin Shirikada Al-Karam Trading Company <u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u>	307



QAYBTA LABAAD:

XEER MADAXWEYNE:



REPUBLIC OF



SOMALILAND

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-4734/052017

DATE...07/05/17

XEER MADAXWEYNE Lr: 0783/052017

Magacaabid

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay:

Qodobka 90aad faqradiisa
3aad xarafka (kh) ee
Dastuurka Jamhuuriyadda
Somaliland;

Markuu Tixgeliyay:

Ahmiyadda ay Wakaalada
Horumarinta Waddooyinku
(RDA) U leedahay Dhismaha
iyo horumarinta Qaranka;

Markuu Arkay:


In baahi loo qabo buuxinta
jagada Maareeyaha Wakaalada
Horumarinta Waddooyinka ee
Jamhuuriyada Soomaliland;

Markuu ka Fiirsaday:

Kartidiisa, aqoontiisa iyo
hufnaantiisa shaqo;

Markuu Ku qancay:

In uu hanan karo xilkan loo magacaabay;



Wuxuu Go'aansaday

In Mudane, Ibraahim Siciid Cilmi, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Maareeyaha Wakaalada Horumarinta Waddooyinka (Road Development authority) ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF



SOMALILAND

THE PRESIDENT

JSL/M/XIL/249/1-4735/052017

DATE...07/05/17

Ku: Mudane, Xasan Cali Cismaan,

Maareeyihii Hore ee Wakaaladda Horumarinta Waddooyinka JSL Hargeysa

Ujeedo: Xilka Qaadis

Mudane,

Waxa aan aad kuugu mahadinaya muddadii aynu wada shaqaynaynay. Xilalka Qaranka ayey dabcigeed tahay in ay meerto noqoto oo kolba cid hanan karta loo dhiibo.

Sidaa darted, waxaan gartay in aan kaa qaado xilka Maareeyaha Wakaaladda Horumarinta Waddooyinka ee Jamhuuriyada Somaliland.

Haddaba waxaan kaa rajaynayaa in si niyad sami ah aad ugu wareejiso xilka aad hasay Mudane, Ibraahin Siciid Cilmi, oo aan xilka Maareeyaha Wakaaladda Horumarinta Waddooyinka ee Jamhuuriyada Somaliland u magacaabay.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF



SOMALILAND

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/241-4751/052017

DATE...10/05/17

Ku:	Wasiirka Wasaaradda Madaxtooyada	Guddoomiye
Ku:	Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha	Ku-xigeen
Ku:	Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda	Xubin
Ku:	Wasiirka Wasaaradda Duulista Hawada	Xubin
Ku:	Wasiirka Wasaaradda Diinta iyo Awqaafta	Xubin
Ku:	Wasiirka Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Wacyigelinta	Xubin
Ku:	Wasiirka Wasaaradda Waxbarashada iyo Tacliinta Sare	Xubin
Ku:	Duqa Caasimadda Hargeysa	Xubin
Ku:	Mudane, Maxamed Shugri Jaamac (Rugta Ganacsiga)	Xubin
Ku:	Mudane, Jamaal Caydiid Ibraahin (Rugta Ganacsiga)	Xubin
Ku:	Mudane, Maxamuud Cabdi Jaamac (SOLJA)	Xubin
Ku:	Mudane, Mustafe Sacad Dhimbiil (Sonsaf)	Xubin
Ku:	Mudane, Maxamed Axmed Maxamuud (Sonsaf)	Xubin
Ku:	Mudane, Cumar Cismaan Miigane (Sonyo)	Xubin
Ku:	Mudane, Cabdi-shakuur Sulub Xirsi (Sonyo)	Xubin
Ku:	Marwo, Sahra-kiin Cabdiraxmaan Axmed (Sonyo)	Xubin

Ku:	Marwo, Ismahaan Cabdi-salaan Xassan (Nagaad)	Xubin
Ku:	Mustafe Axmed Xassan (Nagaad)	Xubin
Ku:	Sheekh Cabdiraxmaan Sheekh Axmed Sheekh Cabdi (Guddida Abaaraha)	Xubin
Ku:	Sheekh Maxamed Aadan Muxumed (Guddida Abaaraha)	Xubin
Ku:	Mudane, Cabdi-naasir Yuusuf Cismaan (Xisbiga UCID)	Xubin
Ku:	Mudane, Cabdirashiid Xassan Maxamed (Xisbiga UCID)	Xubin
Ku:	Mudane, Jamaal Jaamac Xaamud (Xisbiga WADDANI)	Xubin
Ku:	Dr. Axmed Aadan Buuxane (Xisbiga WADDANI)	Xubin
Ku:	Sheekh Maxamed Cali Geedi (Xisbiga WADDANI)	Xubin



Ujeedo: Magacaabid Guddida 18-ka May ee Taakuleynta Dadka Abaartu Tabaaleysay

Mudaneyaal iyo Marwooyin,

Sida aad la socotaan waxa foodka inagu soo haya haddii Eebe idmo Xuska Sannad Guuradda 26^{aad} ee Maalinta Qarranimada Somaliland ee 18 May, taas sannad kasta gobollada dalka oo dhan laga sameeyo dabaal-deg baaxad leh.

Haddaba, waxa ii muuqata in sannadkan 2017-ka uu ka duruuf iyo marxalad duwan yahay kuwii hore, maadaama ay dhacday abaar ba'an isla markaana ay jiraan bulsho badan oo ka mida muwaadiniinta Somaliland oo ilaa hadda la il-daran diifta ay abaartu sababtay.

Haddaba;

Markaan Arkay: In duruufu abaartu keentay gaadhay heer ay darxumo iyo diif u dhintaan duur-joogtii, duunyadii la dhaqanayey iyo dadkii noolaa, intuba;

Markii Aan Tixgeliyey: Dareenkii Bulshada Somaliland ee tibaaxayey in ay habboon tahay in sannadkan

Markii Aan Qiimeeyey:

dabaal degga 18-ka May loo beddelo gurmadka dadka tabaalaysan;
Nuxurka ka soo baxay Shirkaa Golaha Wasiirrada ee Lr. 219, ee qabsoomay 20/04/2017, ee ujeeddadiisu ahayd in dabaal-degga 18-kan May loo beddelo Gargaarka iyo Gurmadka dadkeena abaaruhu tabaaleeyeen;

Waxaan Go'aamiyey;

1. In xuska 18-ka May ee sannadkan 2017-ka loo beddelo Taakulaynta iyo Taageerada Bulshada ay abaaruhu saamaayeen.
2. Waxaan idiin magacaabay Guddida Gargaarka iyo Gurmadka Bulshada Somaliland ee Abaaruhu Tabaaleeyeen, oo ka shaqayn doonta hawlahaan;

B) Qaadhaan Uruurin socon doonta ilaa 26-ka bisha June, 2017-ka.

T) Diyaarinta Mashaariic lagu horumarinayo dadka tabaalaysan.

J) Qorshaynta iyo qaybinta mashaariicdaas si ay uga soo kabtaan duunyo la'aanta, diihaalka iyo diifta abaartu reebtay.

Sidaa darted, waxaan idinka rajaynayaa in aad xil weyn oo bini'aadannimo iska saari doontaan gargaarka iyo gurmaaaaadka bulshada Somaliland ee abaaruhu tabaaleeyeen.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF SOMALILAND



THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-4758/052017

DATE24/05/17



XEER MADAXWEYNE Lr:0784/052017

Cafis Madaxweyne

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay: Qodobka 90aad, xubintiisa
5aad ee Dastuurka
Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Arkay: Qodobka 149aad ee Xeerka
Ciqaabta Guud;

Markuu La Tashaday: Masuuliyiinta ay arrintani
khusayso;

Markuu Tixgeliyey: codsiga Cafiska ah ee Ridwaan
Maxamed Xirsi;

Wuxuu Go'aansaday

In laga bilaabo taariikhda maanta uu cafis gaar
ahaaneed u fidiyo Ridwaan Maxamed Xirsi oo
qaranimada Somaliland ka soo hor-jeeday in muddo ah.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF



SOMALILAND

THE PRESIDENT



JSL/M/XERM/249-4789/052017

DATE...24/05/17

XEER MADAXWEYNE Lr: 0785/052017

Magacaabid

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

- Markuu Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Tixgeliyay: Ahmiyadda weyn ee Ku-xigeenka Hanti-dhawrka Guud U leedahay Dhismaha Qaranka;
- Markuu Arkay: In baahi loo qabo buuxinta jagada Ku-xigeenka Hanti-dhawrka Guud ee Qaranka;
- Markuu ka Fiirsaday: Kartidiisa, aqoontiisa iyo hufnaantiisa shaqo;
- Markuu Ku qancay: In uu hanan karo xilkan;

Wuxuu Go'aansaday

In Mudane, Siciid Saleebaan Mire, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Ku-xigeenka Hanti-dhawraha Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF SOMALILAND



THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-4794/052017

DATE25/05/17



XEER MADAXWEYNE Lr:0786/052017

Cafis Madaxweyne

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay: Qodobka 90aad, xubintiisa
5aad ee Dastuurka
Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Arkay: qodobka 149aad ee xeerka
Ciqaabta Guud;

Markuu La Tashaday: Masuuliyiinta ay khusayso;

Markuu Tixgeliyey: Codsiga Cafiska ah ee Cabdi
Maalik Muuse Coldoon ee ku
taariikhaysan 09/04/2017-ka

Wuxuu Go'aansaday

In laga bilaabo taariikhda maanta 25/05/2017 uu cafis
gaar ahaaneed u fidiyo maxbuus Cabdi Maalik Muuse
Coldoon.

Allaa Mahad Leh,


Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF



SOMALILAND

THE PRESIDENT



JSL/M/XERM/249-4808/052017

DATE...28/05/17

XEER MADAXWEYNE Lr: 0787/052017

Magacaabid

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

- Markuu Arkay: Qodobka 90aad, Faqradiisa
3aad ee Dastuurka
Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Tixgeliyay: Ahmiyadda ay La-taliyeyaasha
Madaxweynuhu u leedahay
Dhismaha Qaranka;
- Markuu Arkay: In baahi loo qabo buuxinta
jagada La-taliyaha
Madaxweynaha ee Arrimaha
Dawladaha Hoose;
- Markuu ka Fiirsaday: Kartidiisa, aqoontiisa iyo
hufnaantiisa shaqo;
- Markuu Ku qancay: In uu hanan karo xilkan loo
magacaabay;

Wuxuu go'aansaday

In Mudane, Cismaan Xaaji Cali Cabdillaahi, laga bilaabo taariikhda maanta oo ahaado La-taliyaha Madaxweynaha ee Arrimaha Dawladaha Hoose.



Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF  **SOMALILAND**

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-4811/052017

DATE30/05/17

XEER MADAXWEYNE Lr:0788/052017

Cafis Madaxweyne

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay: Qodobka 90aad, xubintiisa
5aad ee Dastuurka
Jamhuuriyadda Somaliland;


Markuu Arkay: Qodobka 149aad ee Xeerka
Ciqaabta Guud;

Markuu Dersay: Soo jeedintii Wasiirka
Wasaaradda Cadaaladda;

Markuu La Tashaday: Xeer ilaaliyaha Guud ee
Qaranka;

Markuu Tixgeliyey:

xaaladda Caafimaad darro ee
soo wajahday Maxaabiista
Xabsiga Magaalada Burco;



Wuxuu Soo Saaray Cafiskan

Qodobka 1aad:

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland wuxuu cafis gaar ahaaneed u fidiyey Maxaabiista Xukuman ee Xabsiga Magaalada Burco ku xidhan oo tiradoodu dhantahay 87-Maxbuus, laga bilaabo maalinta uu saxeexo cafiskan, marka laga reebo dembiyadan soo socda:

1. Dilka, isku day dil, iyo dhaawac aad u culus eek u xusan qodobada 434,434/17,440(3) ee xeerka Ciqaabta Guud.
2. Dembiyada Qaranimada Ka dhanka ah eek u xusan Qodobada 184 ilaa 239 ee xeerka Ciqaabta Guud.
3. Falal Budhcadnimada eek u xusan Qodobada 484, 485.486 ee Xeerka Ciqaabta Guud, iyo Qodobbada 205/207 ee Xeerka Badda, iyo Xeer Lr.52/2012 ee la dagaalanka Budhcad Badeeda.
4. Maxaabiista faldembiyeedka budhcad-badeeda u xidhan ee laga soo wareejiyey dalka Seychelles ee xadhigooda ku qaadanaya xabsiyada Somaliland.
5. Dembiyada kufsigu iyo dhaqan xumada eek u xusan Qodobada 398, 400 ee Xeerka Ciqaabta Guud.
6. Dembiyada mukhaadaraadka ah ee Xeer Lr. 21/2002 ee 22/03/2002
7. Dembiyada lidka ku ah Hantida Qaranka eek u xusan Qodobada 241, 244 ee XCG iyo kuwa ku xusan Xeerka La-dagaalanka Musuq maasuqa ee Lr.38/2007.
8. Dembiyada culus eek u xusan Xeerka Ciqaabta Ciidamada qalabka sida ee 434/38, 170, 195 (Bis), 102, 98.

Qodobka 2aad:

Cafiskani ma saamaynayo Maxaabiista Garsugayaasha ah iyo kuwa la xukumay cafiskan dabadii.



Qodobka 3aad:

Cafiskani ma saameynayso xuquuqda madaniga ah ee ka dhalatay dembiga.

Qodobka 4aad:

Cafiskani ma saameynayo raadka ciqaabeed ee uu reebayo dembigu, sida ku xusan Qodobka 92aad ee Xeerka Ciqaabta Guud.

Qodobka 5aad:

Waxaa cafiskan fulinaya Xafiiska Xeer ilaalinta guud ee Qaranka, iyadoo la raacayo liiska maxaabiista ee halkan ku lifaaqan.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

QAYBTA SADDEXAAD:

XEER NIDAAMIYAYAASHA WASAARADAHA, XEERARKA GOLAYAASHA DEEGAANKA, NATIJJOOYINKA DOORASHOYINKA & BARNAMIJYADA DAWLADA



JAMHUURIYADDA SOMALILAND



REPUBLIC OF SOMALILAND

WASAARADDA CADAALADDA

MINISTRY OF JUSTICE

XAFIISKA WASIIRKA

MINISTER OFFICE

WC&AG/XW/G-02/169/17

04/04/2017

Ku: Radio Hargaysa,

=Hargaysa=

Ku: Telefishanka Qaranka SLNTV,

=Hargeysa=

Dg: Dhamaan guddumiyayaasha Maxkamada Racfa

=Fadhiyadooda=

Dg: Xeer ilaliya guud ee qaranka

=Hargaysa=

Dg: Guddoomiyaha Maxkamada Sare JSL

=Xaruuntiisa=

Dg: Garyaqaanka Guud ee Dawlada

=Hargaysa=

UJ: FULIN GO'AAN KA SOO BAXAY GUDIGA CADAALADDA JSL

Wasaraadda Cadaaladda ee JSL, iyadoo cuskanaysa Qodobka 106aad ee Dastuurka Qaranka Faqradiisa **1aad**, kaas oo qeexaya inay Wasaraadda Cadaaladdu u xil saarantahay Fulinta Go'aanada Guddiga Cadaalada.

Sidaa darted, waxaanu Halkan ku faafinaynaa Go'aanka Lanbarkiisu yahay **MS/GGC/G-03/01/2017** ee **03/04/2017**.

**GUDIGA CADAALADDU WAXAY GO'AAMIYEEN
QODOBADAN HOOS KU QORAN**



QOD.1AAD

Magacaabid Garsoorayaal


1. **C/raxmaan Cabdilaahi Saciid**, waxaa loo Magacaabay Garsoore Maxkamada Degmada Ceerigaabo.
2. **Khadar Axmed Faarax**, Waxa loo Mgacaabay Garsoore Maxkamada Gob/Degmo Gabiley.
3. **Mawliid Dayib Axmed**, waxa loo Magacaabay Garsoore Maxkamada Degmada Barbara.
4. **Xamsa Dubad C/llahi**, waxaa laga Magacaabay Garsoore Maxkamadda Degmada Hargeysa.
5. **Axmed Maxamed Axmed**, waxaa loo Magacaabay Garsoore Maxkamadda Degmada Allaybaday.

QOD. 2AAD

Magacaabid ku Xigeen Xeer Ilaaliyayaal.

1. **Aamina Axmed Askar**, waxaa loo Magacaabay ku Xigeen Xeer Ilaaliye Guud ee Xafiiska Xeer Ilaalinta Gobolka Saaxil.
2. **Muna Mahdi Ciise**, waxaa loo Magacaabay ku Xigeen Xeer Ilaaliye Guud ee Xafiiska Xeer Ilaalinta Gobol/Degmo Gabiley.
3. **Fadxiya C/Kariin Sh. Xasan**, waxaa loo Magacaabay ku Xigeen Xeer Ilaaliye Guud ee Xafiiska Gobolka Saaxil.
4. **Mahad Maxamed Xirsi**, waxaa loo Magacaabay ku Xigeen Xeer Ilaaliye Guud ee Xafiiska Gobolka Hawd.

5. **Cabdale Daahir Aadan**, waxaa loo Magacaabay ku Xigeen Xeer Ilaaliye Guud ee Xafiiska Gobolka Togdheer.
6. **Cali C/llaahi Hufane**, waxaa loo Magacaabay ku Xigeen Xeer Ilaaliye Guud ee Xafiiska Gobolka Toddheer.



QOD.3AAD
Ansixin Bedelaado.

1. **C/llaahi Cali Yuusuf**, waxaa laga bedelay Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Gobolka Saaxil Berbera, waxaana loo bedelay Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Gob/Dego Gabilay.
2. **Maxamed Jaamac Ibraahim**, waxaa laga bedelay Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Gobolka M/jeex Hargeysa, laguna bedelay Xafiiska Xeer Ilaaliyanta Gobol Saaxil Berbera.

ALLAA MAHAD LEH

Axmed Faarax Cadare
WASIIRKA CADAALADDA JSL.



XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD JSL

XIG/JSL/165/2017.

1 0/05/2017

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Hargaysa

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska xeer ilaalinta guud in ay Diiwaangeliso Shirikadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda magaceedu yahay, SALSABIL GENERAL TRADING COMPANY.


Markuu Arkay: - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland.

Markuu arkay: - Saxeexa saamiilaha Shirkaddu ay saxeexay sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliye.y

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwaan gashan tahay shirkada magaceedu yahay **SALSABIL GENERAL**

TRADING COMAPANY, Astaanteeduna tahay: -
(Magaca shirkada), shaqadeeduna tahay soo Dejinta
Allaabooyinka (Import), xarunteeduna tahay Magaaladda
Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay
10/05/2017



Allaa Mahad Leh.

(Yusuf Sh. C/laahi Kaahin)

Ku Simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL.

JAMHUURIYADDA  **SOMALILAND**

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD JSL

XIG/JSL/169/2017.

14/05/2017

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda
Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer
Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya
Xafiiska xeer ilaalinta guud in ay
Diiwaangeliso Shirikadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda magaceedu yahay,
GOLIS PRINTING STATIONARY LTD,
oo ay ku cad yihiin xubnaha
shirkaddu, sida ku cad qodobka

11aad(2)(a) Somaliland Compony Law.

Markuu Arkay: - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland, Saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay: - Saxeexa saamiilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliye.y

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwaan gashan yahay shirkada magaceedu yahay **GOLIS PRINTING STATIONARY LTD, Astaanteeduna tahay:** - (Xarfaha GPS), shaqadeeduna tahay Soo Dejinta qalabka Daabacaadda (Import), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargaysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 14/05/2017.

Allaa Mahad Leh.

(Yusuf Sh. C/laahi Kaahin)

Ku Simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL.

JAMHUURIYADDA  **SOMALILAND**

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD JSL

XIG/JSL/170/2017.

14/05/2017

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Hargeysa.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska xeer ilaalinta guud in ay Diiwaangeliso Shirikadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda magaceedu yahay, SAMA-WADE GENERAL TRADING.

Markuu Arkay: - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland.

Markuu arkay: - Saxeexa saamiilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliyey.Y

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwaan gashan tahay shirkada magaceedu yahay **SAMA-WADE GENERAL TRADING, Astaanteeduna tahay:** - (Magaca shirkada), shaqadeeduna tahay soo dejinta Allaabooyinka (Import), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 14/05/2017

Allaa Mahad Leh.

(Yusuf Sh. C/laahi Kaahin)

Ku Simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL



XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD JSL

XIG/JSL/171/2017.

14/05/2017

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Hargaysa

Ujeedo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska xeer ilaalinta guud in ay Diiwaangeliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda magaceedu yahay, HYPER CLOUD TECHNOLOGY SERVICES.

Markuu Arkay: - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yahay Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland.

Markuu arkay: - Saxeexa saamiilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliyey.y

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwaan gashan tahay shirkada magaceedu yahay **HYPER CLOUD TECHNOLOGY SERVICES Astaanteeduna tahay:** -

(Xarfaha HCT), shaqadeeduna tahay adeega ICT (ICT Service) xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 14/05/2017.

Allaa Mahad Leh.

(Yusuf Sh. C/laahi Kaahin)

Ku Simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL

JAMHUURIYADDA  SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD JSL

XIG/JSL/172/2017.

14/05/2017

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.


Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska xeer ilaalinta guud in ay Diiwaangeliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda magaceedu yahay, AL-GEBRA ENGINEERING COMPANY LTD, oo ay ku cad yihiin xubnaha shirkadu, sida ku cad qodobka 11aad (2)(a) Somaliland Company law.

Markuu Arkay: - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin.



Markuu arkay: - Saxeexa saamiilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliyey.y

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwaan gashan tahay shirkada magaceedu yahay, **AL-GEBRA ENGINEERING COMPANY LTD Astaanteeduna tahay:** - (Xarfaha AECO), shaqadeeduna tahay (Engineering Service), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargaysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 14/05/2017

Allaa Mahad Leh.

(Yusuf Sh. C/laahi Kaahin)

Ku Simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL

JAMHUURIYADDA



SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD JSL

XIG/JSL/173/2017.

14/05/2017

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska xeer ilaalinta guud in ay Diiwaangeliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda magaceedu yahay, AL FATXI LOGISTICS SERVICES LTD, oo ay ku cad yihiin xubnaha shirkadu, sida ku cad qodobka 11aad (2)(a) Somaliland Company law.

Markuu Arkay: - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin

Markuu arkay: - Saxeexa saamiilaha Shirkaddu uu saxeexay sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliyey.y

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwaangashan tahay shirkada magaceedu yahay **AL FATXI LOGISTICS SERVICES LTD, Astaanteeduna tahay:** - (Xarfaha AFLS), shaqadeeduna tahay Saad siinta (Logistics and Procurement), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 14/05/2017

Allaa Mahad Leh.

(Yusuf Sh. C/laahi Kaahin)

Ku Simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL



JAMHUURIYADDA



SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD JSL

XIG/JSL/174/2017.

21/05/2017

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska xeer ilaalinta guud in ay Diiwaangeliso Shirikadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda magaceedu yahay, BARBERA REAL ESTATE COMPANY.

Markuu Arkay: - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yahay Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland

Markuu arkay: - Saxeexa saamiilaha Shirkaddu uu saxeexay sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliyey.y

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwan gashan tahay shirkada magaceedu yahay, **BARBERA REAL ESTATE COMPANY, Astaanteeduna tahay:** - (Magaca shirkada), shaqadeeduna tahay Bixinta adeegyada (Real Estate service), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 21/05/2017

Allaa Mahad Leh.

(Yusuf Sh. C/laahi Kaahin)

Ku Simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL

JAMHUURIYADDA



SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD JSL

XIG/JSL/175/2017.

17/05/2017

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska xeer ilaalinta guud in ay Diiwaangeliso Shirikadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda magaceedu yahay, QUICK CHAIN INTERNATIONAL TRADING & LOGISTIC COMPANY, oo ay ku cad yihiin xubnaha shirkadu, sida ku cad qodobka 11aad (2) (a) Somaliland Company law.

Markuu Arkay: - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay: - Saxeexa saamiilayda Shirkaddu uu saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliyey.y

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwan gashan tahay shirkada magaceedu yahay **QUICK CHAIN INTERNATIONAL TRADING & LOGISTIC COMPANY, Astaanteeduna tahay:** - (Magaca shirkada), shaqadeeduna tahay soo Dejinta allaabooyinka (Import), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 17/05/2017

Allaa Mahad Leh.

(Yusuf Sh. C/laahi Kaahin)

Ku Simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL

JAMHUURIYADDA



SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD JSL



XIG/JSL/176/2017.

21/05/2017

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska xeer ilaalinta guud in ay Diiwaan geliso Shirikadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda magaceedu yahay, EGG HOUSE POULTRY FARM.

Markuu Arkay: - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yahay Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland.

Markuu arkay: - Saxeexa saamiilaha Shirkaddu uu saxeexay sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliyey.y

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwan gashan tahay shirkada magaceedu yahay **EGG HOUSE POULTRY**

FARM: - Astaanteeduna tahay: - (Beed Magaca Shirkadu ku wareegsan yahay), shaqadeeduna tahay wax soo saarka digaaga (Local Poultry Production), xarunteeduna tahay Magaaladda Burco, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 21/05/2017

Allaa Mahad Leh.

(Yusuf Sh. C/laahi Kaahin)

Ku Simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL

JAMHUURIYADDA  **SOMALILAND**

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD JSL

XIG/JSL/177/2017.

21/05/2017

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.


Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska xeer ilaalinta guud in ay Diiwaan geliso Shirikadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda magaceedu yahay, MANAGEMENT INTERNATIONAL CONSULTANCY.

Markuu Arkay: - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer

NO.25/2004 Company Act of
Somaliland.



Markuu arkay: - Saxeexa saamiilaha Shirkaddu uu saxeexay sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliyey.y

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwan gashan tahay shirkada magaceedu yahay **MANAGEMENT INTERNATIONAL CONSULTANCY, Astaanteeduna tahay:** - (Magaca shirkada), shaqadeeduna tahay soo La talinta dhinaca Ganacsiga (Business Consultancy Service), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 21/05/2017

Allaa Mahad Leh.

(Yusuf Sh. C/laahi Kaahin)

Ku Simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL

JAMHUURIYADDA  SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD JSL

XIG/JSL/178/2017.

21/05/2017

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Hargaysa

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska xeer ilaalinta guud in ay Diiwaangeliso Shirikadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda magaceedu yahay, RAYXAAN COMPANY LTD, Oo ay ku cad yihiin xubnaha shirkadu, sida ku cad qodabka 11aad (2) (a) Somaliland Company law.

Markuu Arkay: - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin

Markuu arkay: - Saxeexa saamiilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliye.y

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwaan gashan tahay shirkada magaceedu yahay **RAYXAAN COMPANY LTD, Astaanteeduna tahay:** - (Magaca Shirkada), shaqadeeduna tahay Soo Dejinta allaabooyinka (Import), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 21/05/2017

Allaa Mahad Leh.

(Yuusuf Sh.C/laahi Kaahin)

Ku SimahaXeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL.

JAMHUURIYADDA



SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD JSL



XIG/JSL/179/2017.

24/05/2017

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska xeer ilaalinta Guud in ay Diiwaangeliso Shirikadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda magaceedu yahay, AK TURK EXPORT & INTERNATIONAL. TRADE COMPANY.

Markuu Arkay: - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yahay Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland.

Markuu arkay: - Saxeexa saamiilaha Shirkaddu uu saxeexay sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliye.y

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwaan gashan yahay shirkada magaceedu yahay **AK TURK EXPORT & INTERNATIONAL TRADE COMPANY, Astaanteeduna tahay:** - (Magaca shirkada), shaqadeeduna tahay (Cargo Services), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargaysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 24/05/2017.

Allaa Mahad Leh.

(Yuusuf Sh.C/laahi Kaahin)

Ku SimahaXeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL.

JAMHUURIYADDA



SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD JSL

XIG/JSL/180/2017.

28/05/2017

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Hargeysa.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaangeliso Shirikadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda magaceedu yahay, HORYAAL ALHUDA GENERAL TRADING.

Markuu Arkay: - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yahay Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland.

Markuu arkay: - Saxeexa saamiilaha Shirkaddu uu saxeexay sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliyey.Y

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwaan gashan tahay shirkada magaceedu yahay **HORYAAL ALHUDA GENERAL TRADING, Astaanteeduna tahay:** - (Magaca Shirkada), shaqadeeduna tahay Soo Dejinta Allaabooyinka (Import), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 28/05/2017

Allaa Mahad Leh.

(Yuusuf Sh.C/laahi Kaahin)

Ku Simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL.

JAMHUURIYADDA  SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD JSL

XIG/JSL/181/2017.

28/05/2017

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Hargaysa

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaangeliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda magaceedu yahay, C&Y SUGAR CANE JUICE COMPANY LTD, oo ay ku cad yihiin xubnaha shirkadu, sida ku cad qodobka 11aad (2)(a) Somalind Company law.

Markuu Arkay: - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay: - Saxeexa saamiilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliyey.y

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwaan gashan tahay shirkada magaceedu yahay **C&Y SUGAR CANE JUICE COMPANY LTD, Astaanteeduna tahay:** - (Magaca Shirkada), shaqadeeduna tahay soo Dejin iyo Dhoofin (Import and Export), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 28/05/2017.

Allaa Mahad Leh.

(Yuusuf Sh.C/laahi Kaahin)

Ku SimahaXeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL.

JAMHUURIYADDA  **SOMALILAND**
XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD JSL

XIG/JSL/182/2017.

28/05/2017

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaangeliso Shirikadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda magaceedu yahay, HARGEISA SUITS HOUSE.


Markuu Arkay: - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yahay Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland.

Markuu arkay: - Saxeexa saamiilaha Shirkaddu uu saxeexay sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliyey.y

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwaan gashan tahay shirkada magaceedu yahay, **HARGEISA SUITS HOUSE,**

Astaanteeduna tahay: (Magaca Shirikada), shaqadeeduna tahay soo Dejinta Allaabooyinka (Import), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, Jaga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 28/05/2017



Allaa Mahad Leh.

(Yuusuf Sh.C/laahi Kaahin)

Ku SimahaXeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL.

JAMHUURIYADDA  SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD JSL

XIG/JSL/183/2017.

28/05/2017

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.


Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaangeliso Shirikadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda magaceedu yahay, EMDAD SOLUTIONS AND SERVICE.

Markuu Arkay: - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yahay Xeerka Shirkadaha Xeer

NO.25/2004 Company Act of
Somaliland,



Markuu arkay: - Saxeexa saamiilaha Shirkaddu uu saxeexay sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliyey.y

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwaangashantahay shirkada magaceedu yahay, **EMDAD SOLUTIONS AND SERVICE Astaanteeduna tahay:** - (EMDAD), shaqadeeduna tahay Bixinta adeegyada ICT (ICT), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 28/05/2017

Allaa Mahad Leh.

(Yuusuf Sh.C/laahi Kaahin)

Ku Simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL.

JAMHUURIYADDA



SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD JSL

XIG/JSL/184/2017.

28/05/2017

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaangeliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda magaceedu yahay, TACAB MAAL LASHING COMPANY.

Markuu Arkay: - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yahay Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland.

Markuu arkay: - Saxeexa saamiilaha Shirkaddu uu saxeexay sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliyey.y

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwan gashan tahay shirkada magaceedu yahay **TACAB MAAL LASHING COMPANY, Astaanteeduna tahay:** - (Magaca shirkada), shaqadeeduna tahay bixinta adeegyada (Lashing Container Vessels), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 28/05/2017

Allaa Mahad Leh.

(Yuusuf Sh.C/laahi Kaahin)

Ku Simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL.

JAMHUURIYADDA



SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD JSL



XIG/JSL/185/2017.

28/05/2017

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelin Shirkadaha.

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaangeliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda magaceedu yahay, ABDALLAH BEN SAYID POULTRY FARM.

Markuu Arkay: - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yahay Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland.

Markuu arkay: - Saxeexa saamiilaha Shirkaddu uu saxeexay sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliyey.y

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwan gashan tahay shirkada magaceedu yahay, **ABDALLAH BEN SAYID POULTRY FARM Astaanteeduna tahay:** - (Magaca shirkada), shaqadeeduna tahay ka ganacsiga beedka iyo Digaaga (poultry farm), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 28/05/2017

Allaa Mahad Leh.

(Yuusuf Sh.C/laahi Kaahin)

Ku SimahaXeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL.

JAMHUURIYADDA  **SOMALILAND**

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD JSL

XIG/JSL/187/2017.

31/05/2017

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirikadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda magaceedu yahay, AL-KARAM TRADING COMPANY.

Markuu Arkay: - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yahay Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland.

Markuu arkay: - Saxeexa saamiilaha Shirkaddu uu saxeexay sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliyey.y

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwan gashan tahay shirkada magaceedu yahay, **AL-KARAM TRADING COMPANY, Astaanteeduna tahay:** - (Magaca shirkada), shaqadeeduna tahay soo Dejinta allaabooyinka (Import), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 31/05/2017

Allaa Mahad Leh.

(Yuusuf Sh.C/laahi Kaahin)

Ku Simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL.